

Xog muhiim ah oo ku saabsan sida Home Forward iyo Gurigaaga ay saamayn karaan  
Tallaabooyinka ay Dhawaan Waday Dawlada Federaalka

## XANIBAADA MAAL GELINTA FEDERAALKA

Laga bilaabo Febraayo 7, 2025, dawlada federaalka ayaa soo saartay dukumiinti xanibaaya maal gelinta federaalka, labo maxkamadood ayaana si ku meel gaar ah u joojiyay xanibaada.

Home Forward **AYAYSAN HADDA** saamayn kasoo gaarin tallaabooyinka dhawaan la qaaday ee lagu joojinaayo maal gelinta federaalka ah waxayna helaysaa maal gelinta loo baahan yahay si aan uga shaqeyno guryaheena iyo barnaamijyadeena sidii caadiga ahayd.

## AMARADA FULINTA

Home Forward maaha wakaalad hoos tagta dawlada federaalka ah si toos ahna uma qabanayaan Amarada Fulinta (EOs) ee dhawaan soo baxay. EO-yada ayaa qabanaaya wakaaladaha federaalka sida Waaxda Guriyaynta iyo Hormarin Magaallada (Department of Housing and Urban Development, HUD). HUD ayaa bixisa xeerarka iyo maal gelinta tiro badan oo kamid ah barnaamijyada guriyaynta ee Home Forward. Laga bilaabo Febraayo 7, 2025, ma jiraan wax isbadello ah oo lagu sameeyay HUD oo saamaynaaya shaqooyinka Home Forward ama gurigaaga. Isbadellada mustaqbalka ee HUD ayaa saameyn noogu yeelan kara qaabab aanaan wali ogayn.

## DEDAALKA HOME FORWARD

Home Forward waxay ku dedaalaysaa inay ku siiso guri xasiloon. Wax isbadello **KUMA** samayn doono shaqooyinkeena kuwaasoo saamayn xun kugu yeelanaaya, ilaa in uu nagu qasbo maahee isbadel lagu sameeyay sharciga ama aan wayno maal gelinta.

Home Forward ayaa dedaal gelinaysa inay idin ku wargeliso haddii wax isbadello ah ay saameeyaan awoodeena ku aadan inaan ku siino guri xasiloon adoo booqanaaya [www.HomeForward.org](http://www.HomeForward.org).

## NASOO WARGELI

Haddii aad walaacyo ka qabto tallaabooyinka dhawaan la qaaday ee federaalka, waxaa laga yaabaa inaad dooneysa inaad la wadaagto saraakiishaada la doortay.

[https://www.congress.gov/  
members/find-your-member](https://www.congress.gov/members/find-your-member)

Home Forward Ayaa Sii Wadi Doonta inay Hooy siiso Qof Kasta Ayadoo aan Loo Eegayn Xaalada Socdaalka sida uu Ogolaaday Sharcigu